# Qaybta Naafada Korriinka Khayraadka adeegyada la cafiyay ee HCBS

Luuliyo 2025

## La Kulanka Baahiyaha iyada oo loo Marayo Adeegyada Guriga iyo Bulshada Ku Salaysan (HCBS) ee dadka laga cafiyay

Jawaabaha Su'aalaha Caadiga ah ee ku Saabsan adeegyada la cafiyay ee HCBS.

### Marka uu Ka qaybgalaha Doonayo adeeg laga cafiyay oo Kale

Ka qaybgalaha wuxuu u baahan yahay inuu buuxiyo shuruudaha u-qalmitaanka ee adeegyada la cafiyay ee la codsaday:

| AD<br>Waayeel iyo Naafada | TBI<br>Dhaawaca maskaxda ee xanuunka badan | FSW<br>Taageerada qoyska | DDAD<br>Maalinta dadka wayn | CDD<br>Dhmeystiran |
|---|---|---|---|---|
| U-qalmidda Medicaid | U-qalmidda Medicaid | U-qalmidda Medicaid | U-qalmidda Medicaid | U-qalmidda Medicaid |
| Heerka Daryeelka (LOC) Xarunta Kalkaalinta (NF) | Heerka Daryeelka (LOC) Xarunta Kalkaalinta (NF) | Xarunta Daryeelka Dhexe (ICF) Heerka daryeelka (LOC) | Xarunta Daryeelka Dhexe (ICF) Heerka Daryeelka (LOC) | Xarunta Daryeelka Dhexe (ICF) Heerka daryeelka (LOC) |
| Dhamaan da'ada | Da'ada 18 sano iyo wixi ka wayn | Dhalashada ila da'ada 21 sano | Da'ada 21 sano iyo wixi ka wayn | Dhammaan da'aha, xaddidaadyo ku saabsan adeegyada gaarka ah |
| Qiimeynta hawlaha nolol maalmeedka, arrimaha halista, xaaladaha caafimaad, faragelinta, iyo hawsha garashada, | Baaritaanka TBI iyo qiimeynta hawlaha nolol maalmeedka (ADLs), arrimaha halista, dadaalada, iyo hawsha garashada | Buuxi qeexidda naafada korriinka (Neb. Rev. Stat. §83-1205) | Buuxi qeexidda naafada korriinka (Neb. Rev. Stat. §83-1205) | Buuxi qeexidda naafada korriinka (Neb. Rev. Stat. §83-1205) |
| Qiimaynta LOC waxay muujineysaa baahi aan la daboolin oo adeegyo ah | Qiimaynta LOC waxay muujineysaa baahi aan la daboolin oo adeegyo ah | Qiimaynta LOC waxay muujineysaa baahi aan la daboolin oo adeegyo ah | Qiimaynta LOC waxay muujineysaa baahi aan la daboolin oo adeegyo ah | Qiimaynta LOC waxay muujineysaa baahi aan la daboolin oo adeegyo ah |

### Marka uu Ka qaybgalaha ama Mas'uulka uu ku raacsanayn Heerka Daryeelka

Marka uu ka qaybgalaha ama mas'uulkiisu ku raacsanayn dhibcaha qiimeynta LOC ama maalgelinta ka dhalatay, waxay ka caban karaan go'aanka 90 maalmood gudahood laga bilaabo ogeysiiska. Marka ka qaybgalaha hadda la maalgelinayo oo uu racfaan ka qaato 10ka maalmood ee ugu horreeya laga bilaabo taariikhda boostada ee ogeysiiska, maalgelinta hadda jirta way sii soconaysaa ilaa racfaanka la dhammeeyo, marka ka qaybgalaha uu muujiyo inuu doonayo in adeegyadu sii jiraan.

### Marka Adeegyada Hadda Jira Aysan Daboolin Baahiyaha Hadda Jira

Qiimeynta LOC ee hadda jirta dib ayaa loo eegaa, waxaana la diiwaangeliyaa isbeddellada baahiyaha ama awoodaha.

- Adeegyada la cafiyay ee AD iyo TBI, tan waxaa sameeya ka qaybgalaha.
- Adeegyada la cafiyay ee Naafada Korriinka (FSW, DDAD, iyo CDD), tan waxaa sameeya ka qaybgalaha iyo kooxdiisa.

Marka ay jiraan isbeddello la taaban karo oo ku yimid baahiyaha ama awoodaha saameeya maalgelinta ama u-qalmitaanka, Isuduwaha Adeegga (SC) wuxuu qabanqaabin doonaa oo fududayn doonaa shirka qorshaynta qofka-udub-dhexaadka u ah (PCP) si looga wada hadlo sababta codsiga ah in la dhammaystiro qiimayn cusub oo LOC ah iyo/ama in loo wareego adeeg cafin kale.